

## Waa maxay Mashruuca Sharciga Dadka Waayeelka ah?

Mashruuca Sharciga Dadka Waayeelka ah (SLP) waa barnaamijka tabaruca qareenka oo uu maalgelisay Qaybta Adeegyada Dadka Waayeelka ah, Naafadda, Halgamayaasha ee Degaanka Multnomah oo ay shaqadiisa hayaan Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon.

Qareeno tabaruc ah ayaa ballan 30 daqiiqo ah oo lacag la'aan ah dadka waayeelka ah ku siiya sagaal xarumood oo dadka waayeelka ah oo kala duwan ku yaala Degaanka Multnomah.

## Qareenka Mashruuca Sharciga Dadka Waayeelka ah Miyuu I Caawin Karaa?

Qareenada SLP waxay caawimaad ka geysan karaan arrimaha dhanka sharciga madaniga ah sida qorshaynta hantida, arrimaha dhanka macmiilka, iyo dhibaatooyinka dhanka guryaha. Haddii aad rabto in aad ogaato in qareenka SLP uu ku caawin karo, wac xaruntaada dadka waayeelka ah ee degaanka oo weydii.

Waxaad u qalantaa ballan 30 daqiiqo ah oo lacag la'aan ah oo lala leeyahay qareen tabaruc ah haddii aad tahay:

- 60 jir ama ka weyn tahay, guursatay qof da'diisu tahay 60 jir ama ka weyn tahay;
- qof degan Degaanka Multnomah; ama qabto arrin dhanka sharciga oo ka jirta Degaanka Multnomah; isla markaana tahay
- Muwaadin Maraykanka ah ama qof si sharci ah u degan. Waxyaabaha qaarkood oo la iska reebayo oo loogu talagalay rabshada qoyska ayaa jira.

## La xiriir LASO

### Legal Aid Services of Oregon

Portland Regional Office  
520 SW 6th Ave., Suite 700  
Portland, OR 97204

**Telefoonka:** 503-224-4086

**Fax-ka:** 503-295-9496

## Waxyaabo Dheeraad oo Ku saabsan LASO

LASO waxa qabataa oo kaliya kiisaska madaniga ah ee (aan fal-dembiyeedka ahayn). Qareenada LASO waxay caawimaad ka geystaan guryaha, iska saarida/cayrinta guryaha, xiritaanka/la wareegida hantida, ku xadgudubka waayeelka, bixinta daryeelka, sharciga qoyska, dhaqaale la'aanta qofka la soo daristay 'bankruptcy' iyo amarka wax lagu ilaalinayo. Si loogu qalmo adeegyadeena dhanka sharciga ee lacag la'aan ah, macaamiisha intooda badani waa in ay u qalmaan sida ay dhigayaan tilmaamaha dakhliga saboolnimada ee federaalka.

LASO waxay awoodaa in ay bixiso taageero dhanka sharciga sababta oo ah iyada oo qayb ka ah deeqda lacageed ee federaalka iyo gobolka. Waxaan sidoo kale la shaqeynaa qareenada degaanka ee aqbala tiro kooban oo ah kiisaska oo aan la iska qaadayn wax kharash ah 'pro bono', ama lacag la'aan ah. Iyada oo sababtu tahay ilo xaddidan/kooban oo jira, ma awoodno in aanu taageero dhanka sharciga ah siino dhammaan shakhsiyaadka u qalma. Waxaanu aqbalnaa kiisaska iyada oo hadba lagu saleynayo helitaanka shaqaalaha, awooda uu leeyahay kiiskaagu, iyo haddii uu kiiskaagu waafaqsan yahay ama uusan waafaqsanayn liiska waxyaabaha muhiimada la siinayo ee xafiiskayaga ee hadda jira.



## Mashruuca Sharciga Dadka Waayeelka ah

*Qareeno ayaa bixinaya adeegyo dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka waayeelka ah*



## Ma u baahan tahay caawimaada arrimaha dhanka sharciga madaniga ah?

Haddii aad tahay 60 jir ama ka weyn tahay oo aad ku nooshahay Degaanka Multnomah ama qabto arrin dhanka sharciga oo ka jirta Degaanka Multnomah waxaad la kulmi kartaa qareen tabaruc ah **oo loogu talagalay isla talin 30 daqiiqo ah oo lacag la'aan ah.**

## Waa Maxay Kharashka Ballanta 30-ka Daqiiqo ah?

Ma jirto wax lacag oo la qaadayo oo loogu talagalay ballanta 30-ka daqiiqo ah ee lala leeyahay qareen tabaruc ah.

## Ka Waran Haddii Aan u Baahanahay Caawimaad Dhanka Sharciga ah?

Haddii uu qareen tabaruc ah oggolaado in uu qaato kiiskaaga, adeegyadu waxay noqon doonaan kuwo lacag la'aan ah haddii aad buuxiso heerarka dhaqaalaha ee Gargaarka Sharciga ah.

Haddii aadan u qalmin sii wadashada adeegyada lacag la'aanta isla markaana aad jeclaan lahayd in aad qabsato qareen tabaruc ah, waxaad qareenka kala hadli kartaa lacagta/kharashka uu isagu/iyadu qaadayo.

Haddii aad jeclaan lahayd in aad qabsato qareen tabaruc ah, waxaad Adeega Gudbinta Qareenada Gobolka Oregon kala xiriiri kartaa 1-800-452-7636. Waxay ku siin karaan magaca qareen kaa caawin kara arrin dhanka sharciga ah oo gaar ah.

## Miyuu Adeegyada Gargaarka Sharciga ahi Qaadan Karaa Kiiskayga?

Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon (LASO) waa hay'ad sharci oo oo aan faa'iido doon ahayn oo bixisa adeegyada dhanka sharciga oo loogu talagalay dadka dakhligoodu hooseeyo. Ma jirto wax lacag oo la qaadayo oo loogu talagalay adeegyada dhanka sharciga oo ka jira LASO, laakiin waxaa jira ilo kooban iyada oo kiisaska oo dhana aan la aqbalin.

LASO waxay leeyihiin shaqaale qareeno ah oo ku takhasusay sharciga dadka waayeelka ah iyo caawimaad ka geysashada xarumaha daryeelka dadka waayeelka, guryaha daryeelka dadka waayeelka ah,

xarumaha dadka naafada ah, goobaha la degan tahay, Daryeelka Guriga-Dhexdiisa ee Medicaid, Medicare, ku xadgudubka waayeelka, iyo ilaalinta. Haddii aad caawimaad uga baahan tahay mid ka mid ah arrimahan, LASO ka wac 503-224-4086.

## Maxay Tahay In aan U soo Qaato Ballantayda?

Fadlan soo qaado wixii dokumenti qoraal ah ee aad haysato ee la xiriira arrinta dhanka sharciga ah ee aad qabto. Dokumentiga waxaa ku jiri kara waraaqo, sawirro, dokumintiyoy sharci ah, ama email.



## Sidee Baan U Sameystaa Ballan?

Jadwalka xarunta caafimaadka sharciga ah ee SLP wuxuu ku qoran tahay hoosta. Si aad ballan u sameysato, wac xarunta kugu habboon adiga.

### YWCA/ East County

600 NE 8th St, Room 100  
Gresham, OR 97030  
(503) 721.6771  
Maalmaha Jimcaha ee 2-aad & 4-aad 1 - 4 galabnimo

### Friendly House

1737 NW 26th Ave  
Portland, OR 97209  
(503) 224-2640  
Maalmaha Khamiista ah ee 1-aad & 3-aad 9 subaxnimo – duhurnimo

### Hollywood Senior Center

1820 NE 40th  
Portland, OR 97212  
(503) 288-8303  
Maalmaha Jimcaha 9 subaxnimo - duhurnimo

### IRCO

740 SE 106th  
Portland, OR 97218  
(503)484.6371  
Maalmaha Khamiista 1 - 4 galabnimo

### NAYA

5135 NE Columbia  
Portland, OR 97218  
Maalmaha Khamiista ee 2-aad & 4-aad 9 subaxnimo – duhurnimo  
Ballamaha NAPOLS ka wac (503) 223-9483

### Neighborhood House

7688 SW Capitol Hwy  
Portland, OR 97219  
(503) 244-5204  
Maalmaha Talaadada ee 2-aad & 4-aad 9 subaxnimo - duhurnimo

### North Senior Services

9009 N. Foss  
Portland, OR 97217  
(503) 288-8303  
Maalmaha Talaadada ee 1-aad 7 3-aad 9 subaxnimo – duhurnimo

### Impact NW SE Portland

4610 SE Belmont  
Portland, OR 97215  
(503) 721.6760  
Maalmaha Arbacada 10 subaxnimo - 1 galabnimo

### Urban League Multi-Cultural Senior Center

5325 NE MLK Blvd  
Portland, OR 97211  
(503) 280-2600  
Maalmaha Talaadada ee 2-aad, 3-aad 4-aad 1-4 galabnimo